Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Fedraalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 3-aad
Ducomentiga Kol.3-aad/Kul.15-aad/2013

13/10/2013

Kalfadiga 3-aad
Kulankiisa 15-aad, Sac.fur. 11:46gh-Sac.Xir .2:00gd.
Guntinta:155
Ajendaha:

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariinka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Ansixinta warbixinta Xeer-Hoosaadka**
4. **Heshiiskii Favouri .**

Shir-guddoomiye,GuddoomiyeKu-xigeenka 2-aad Golaha shacabka Mudane, Mahad Cabdalla Cawad.
Waxaa shirka furay Gyddoomiye Ku-xigeeka 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad,waxaana lagu furay Aaydaha Qur'aanka Kariimka ,uuna akhriyey Xil.Sheekh Shaacir.
Guddoomiyaha wuxuu sheegay in la sii wado doodii shalay,wuxuuna codsadey in la ansixiyo Ajendaha, Xildhibaanadana wey ansixiyeen.
Xil.Khaliif,wuxuu sheegay in Guddiga ay shaqo wanaagsan ay soo qabtey,
Wuxuu soo jeediyey in Xilliyadda Shaqada ay jirto in la yimaado 9:00 Aroornimo 10:00 uu bilaabmo Shirka ,lana soo gababageeyo 1:00 Duhurnimo.Tan Motionka Guddoomiyaha iyo Ku-Xigeenadiisa in sidooda loo daayo.
Xil. Boorow,wuxuu soo jeediyey in Xeer-Hoosaadka sidiisa hore loo daayo Guddoonka shaqadiisa ugu culus waa Furitaanka iyo Xiritaanka ,wuxuu intaa ku daray ,Haddii Xukuumadda Motion laga keeno 3 Bilood ,hadana daba keeno mid 6 bilood ah waa dagaal bilawgiisa
Xil. Faarax Cawad,wuxuu soo jeediyey in Qod.6,27,76-aad in sidoodi hore loo daayo.Guddiga Xeer-Hoosaadkana ay qodobaan dib ugu noqdaan.
Xil. Ibraahim Aadan Dhaayow,wuxuu soo jeediyey in Jadwalka Baarlama-anka ugu danbeyn 10:00 Subaxnimo la yimaado haddii Guddoomiyaha uu maqanyahay,Ku-xigeeynka 1-aad ayaa qabanaayo,hadduu maqanyahay k/xigeynka 1-aad waxaa qabanayaa ,K/Xigeynka 2-aad . Motionka Guddoonkana in sidiisa hore loo daayo.
Xil.Dhuubow,wuxuu soo jeediyey in Qod.6-9-aad in sidooda loo daayo,

Qod 20-aad Maxkamadda Dastuuriga iyo Eedeynta Madax-weynaha haddii aan waxba la weydinkarin wuxuu sheegay in ay dhibaato tahay .
Wuxuu soo jeediyeyin la abuuro Maxkamadda Dastuuriga si loogu yeero Madax-weynaha lana horkeeno Baarlamanka ,wuxuu intaa ku daray Qod.42-aad in Xukuumadda ay codsankarto wixii deg-deg ah ay u baahan –tahay .
Xil. Axmed Taw, wuxuu soo jeediyey in la yimaado 9:00 Aroornimo waqtiga la soo gabagabeynaayo laga dhigo 2:00 ,Fasaxyadana in laga dhigo 25 Casho in ay ka badnaan.habdhawrayaashana sidoo loo daayo.Xuquuqda Xildhibaanada wuxuu soo jeediyey in la siiyo Daryeel iyo Deegaan.
Xil. Bishaaro Cabdi Garabey,waxay soo jeedisey in waqtiga la ilaaliyo lana yimaado 2:00 Aroornimo ,lagana baxo labada duhurnimo.waxay sheegtay in xil. Ceebtooda ay asturaan Guddoonka Hal sano ayaa la shaqeeyey waxaana ka shaqeyney Hal saac.
Xil.Maxamed Iidle Geedi,wuxuu soo jeediyey intii wax la duminlahaa in wax la dhiso.Seddex Bilood Motion in loo daayo ,Habdhawrayaasha iyo Guddoon ka in laga reebo Gunnadooda haddey shaqeysan waayaan.
Xil.Cali Aadan,wuxuu soo jeediyey in Motionka Guddoonka sidiisa loo daay- o Maqnaashaha Xil.marka hore waa in dgniin loo qoro hadduu maqnaado 15 maalmood oo cudur daar la'aan waa in laga jaraa Gunnadiisa .
Xil.Maryan Cariif Qaasin, waxay soo jeedisey Xildhibaankii Maqnaada 100/50 in laga jaro gunnadiisa.waa in la shaqeeyaan 4 saac oo xiriir ah. In sidooda loo daayo tan Guddoonka iyo Habdhawrayaasha .Akhrinta Hindise Sharciyeedka laga dhigo 2-akhris.
Guddoomiyaha , wuxuu sheegay in Xildhibaanadu aad u dadaaleyn llana doonayo in qodob-qodob loo ansixiyo haddey noqon weysi in sidiisi hore loo daayo.
Guddoomiyaha wuxuu sheegay in la soo tiriyo Tirada Xildhibaanada Joogta Markii uu ogaadeyn in tirada joogta cod loogu qaadikarin ayuu guddoomiy- aha u sheegay Xildhibaanada ayna codqaadida noqoneyso Ciidul-Adxaa markii laga soo noqdo
Guddoomiyaha wuxuu sheegay in maanta marti ugu yahay Golaha Wasiirka Warfaafinta Boostada iyo Gaadiidka Mudane,C/llaahi Ciilmooge Xirsi, si uu u akhriyo Heshiiskii ay kala saxiixdeyn Turkiga(Favouri).iyo Wasiirka .
Wasiirka wuxuu akhriyey Heshiiskii Favouri,kuna saabsanaa in garoonka dayuuradaha ee Internationa Air Port. Laga dhigo mid Caalami wuxuuna soo bandhigey Sawir Muuqaaleed Cusub ooah Sida loo dhisidoono Garoon- caalamiga .waxaana heshiis uu ahaa in 100/45.Soomaali ay leedahay inta harteyn oo ah 100/55 ay leeyihiin Shirka Turkiga(Favouri).waxaana heshiiskaasi u soconayaa Muddo 15 sano ah .waxaana ku baxaaya kharash dhan $18.000.000(SideediyotobanMilyan oo dollar).wuxuuna

dhismihiisa soconayaa muddo sided bilood ah wuxuu intaa ku daray in Garoonka lala soo gelikarin wax hub ah.
Guddoomiyaha wuu fasaxay wasiirka ,wuxuu kaloo sheegay in safaro ay Xildhibaanado Xubno ka mid ah ay ka qeygalayaan kuna matalayaan Baarlamaanada Caalamka.,sida ururka Baarlamaanada Africa,Ururka Baarlamaanada Dawladaha Africa,Ururka Baarlamanada Caalamiga,Ururka Baarlamaanka ee Iskaasiga Dalalka Islaamka ,Ururka Baarlamaanka Carabta iyo Ururka Baarlamaanka ACP.EU Wuxuu kaloo sheegay in Ra'isul wasaaraha uu imaanayo golaha 26 Okt. 2013.Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddana uu imaanayo 15 Nov.2013 in uu ka hadlo qorshe hawleedka 2014ka.

Shir-guddoonka Guddomiye K/Xigeenka 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad uu shirgudoominaayey Kal-3-aad Kulankiisa 15-aad uu sheegay in uu xiranyahay shirka saacaddu markey ahayd 2:00gd.